



Heerarka Barnaamijka Labada Lugadood
*EE DARYEELKA IYO HORUMARINTA TAYADA
WAXBARASHADA HORE*



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



Nuxurka

Mahadnaq	2
Asalkii hore	4
Ujeedo	5
Mabaadi'da Hagidda	5
Dulmar guud oo ku saabsan heerarka barnaamijka labada luuqadood	5

Heerarka Barnaamijka Laba-luuqadood oo leh Dhaqamada ugu Fiican	6
Tilmaamaha Dhaqanka iyo Luuqadda Qabiilka	10
Qaamuuska	11
Tixraacyo	12



Mahadnaq

Waxaan jeclaan lahayn inaan u muujinno mahadcelintayada aan la soo koobi karin qof kasta oo gacan ka geystay horumarinta barnaamijka Heerarka Labada Luuqadood. Waad ku mahadsan tahay wadaagida fikradahaaga, khibradahaaga, iyo fikradahaaga ugu fican inta lagu jiray kulamadeena talo bixinta, fadhida naqshadaynta, fadhida dhageysiga, miisaska wareega (focus-group), webinar-ka, sahanada, iyo dib u eegista qabyada ah. Daneeyayaasha, la-hawlgalayaasha, adeeg bixiyayaasha tooska ah, iyo wakiilada qabaa'ilka ayaa iska kaashaday si ay u horumariyaan kheyraad aqoonsan doona oo taageeri doona barnaamijyada labada luuqa-dood iyo daryeelka carruurta iyo qoysaska ku hadla luqadaha badan sanadaha soo socda. Kani waxa uu ahaa mashruuc aad u weyn oo aan suurta gal noqon lahayn caawimadaada la'aanteed. Waad ku mahadsan tahay hoggaanka!



Hogaamiyaasha Mashruuca (project)

ATHENA JIMENEZ-MANALO, M.ED.

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada & Qoysaska

CHARLOTTE CAMPBELL, MIT

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada & Qoysaska

YOLANDA ARELLANO, BS

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada & Qoysaska

Kooxda Naqshada Bixiyaha

Kooxda Naqshad Bixiyaha waxay kulmeen bisha Maajo 2022, si ay dib ugu eegaan Heerarka Barnaamijka Labada Luuqadood ee kooxda shaqada.

MIRIAM ACOSTA

Bixiyaha Daryeelka Carruurta Qoyska / Mulkiilaha
Gobolka Okanogan
Af-Ingiriis-ka, Af-Isbaanish-ka

MARCELA LÓPEZ

Bixiyaha Daryeelka Carruurta Qoyska / Mulkiilaha
Gobolka Chelan
Af-Ingiriis, Af-Isbaanish

FARHIYA OMER

Bixiyaha Daryeelka Carruurta Qoyska / Mulkiilaha
Degmada King
Af-Ingiriis-ka, af-Soomaali

LILIYA AUKHIMOVICH

Bixiyaha Daryeelka Carruurta Qoyska / Mulkiilaha
Gobolka Pierce
Af-Ingiriis-ka, Af-Ruush-ka, Af-Yukreeniyaan

SAVANNA MICHEL

Bixiyaha Daryeelka Carruurta Qoyska / Mulkiilaha
Gobolka Okanogan
Af-Ingiriisi, asal (Indigenous)

GLADYS SANTILLAN

Bixiyaha Daryeelka Carruurta Qoyska / Mulkiilaha
Gobolka Chelan
Af-Ingiriis-ka, Af-Isbaanish-ka

YASMIN IBRAHIM

Bixiyaha Daryeelka Carruurta Qoyska / Mulkiilaha
Degmada King
Af-Ingiriis-ka, Af-Soomaali

Galinta Qabiilka (tribal Input)

Siyaasadda “Indian Policy for Early Learning (IPEL)” ee Waxbarashada Hore (IPEL) guddiga waxaa la aasaasay sanadka 2013. Waaxda (IPEL) waxay la shaqaysaa ururada kale ee (American Indian) si ay u daboolaan baahiyaha wadajirka ah ee dawlada qabaa'ilka si loo hubiyo tayada iyo bixinta adeeg dhamaystiran. Qabiil (tribe) kasta oo dawlada dhexe laga aqoonsan yahay ee ku nool Gobolka Washington waxay xaq u leedahay matalaad IPEL. Wixii macluumaad dheeraad ah, riix inta www.dcyf.wa.gov/tribal-relations/ipel.

Bisha Sebtembar-ka sanadka 2021, Janaayo 2022, Maarso 2022, iyo Meey 2022, (wakiilada DCYF Dual Language)

waxay ka qeyb gali doonaan IPEL si ay u wadaagaan macluumaadka, u bixiyaan cusbooneysiinta, u codsadaan jawaab celin, oo ay u bixiyaan fikrado ku saabsan Heerarka Labada Luuqadood. Bishii Juun 2022, Labada Luuqadood ee DCYF waxa ay martigelisay dood-kooban oo ku saabsan Barnaamijka Soo noolaynta Luuqadda Qabiilka ee Heerarka Labada Luuqadood (Hagaha). Tilmaamaha Labada Luuqadood ee Luuqadda iyo Dhaqanka Qabiilka ayaa lagu soo gabagabeeyey IPEL iyo Fadhiga Dhegeysiga Qabiilka. Washington, qabiil kastaa waa qaran madax-bannaan oo leh taariikh iyo dhaqan u gaar ah. Fikradda qabiilka waxaa loo isticmaali doonaa in lagu meel geliyo halbeegyada labada luuqad.

Kooxda La-talinta Labada Luuqadood

DCYF waxay la shaqeysay dad dhaqan, luqad ahaan, iyo gobol ahaanba kala duwan si ay u abuuraan Heerarka Labada Luuqad ee Washington ee Daryeelka Hore iyo Waxbarashada. Shan jeer, Kooxda Shaqada Labada Luuqad waxay kulmeen si ay u horumariyaan mabaadi'da hagidda iyo diyaarinta Heerarka Labada Luuqadood.



MAGGIE MENDOZA, M.S.

Association of Education
Service Districts (AESD)

SANDY MALDONADO

Child Care Aware (CCA) of Washington

LUISA NAYELI MERCADO

CCA of King & Pierce Co/Child Care Resources

CARMELLA BOWEN

CCA of Central WA/Catholic Charities
serving Central WA

GLORIA APARICIO, BA

CCA of Central WA/Catholic Charities
serving Central WA

ROSA ESCALERA, BS

CCA of Central WA/Catholic Charities
serving Central WA

JENNIFER WEISS-STANDLEY

CCA of Central WA/Catholic Charities
serving Central WA

PATRICK VALISTO

CCA of Eastern WA/Community
Minded Enterprises

KAREN GUZMAN, BECE

CCA Eastern Washington

URSULA MONTES

CCA Eastern Washington

MARIA ISABEL MORA, M.ED

The Imagine Institute

MARINA MEDRANO, BFA

Investing in Children Coalition, Yakima Valley
Community Foundation

LINDA CROWNER

Kennewick School District ECEAP

CECILIA GONZALEZ

La Casa Hogar

WAYLON BALLEW

Lummi Early Learning Programs

YAHYA SUUFI

Muslim American Youth Foundation

EDWARD DAVIS

Muslim American Youth Foundation

RADU SMINTINA, MPA

OneAmerica

PATTY FINNEGAN, PH.D

Office of the Superintendent of Public
Instruction (OSPI)

WILLIAM BELDEN

State Board for Community
and Technical Colleges (SBCTC)

ANNA NIKOLAEVA

State Board for Community and Technical
Colleges (SBCTC)

AMELIA BACHLEDA, PHD

University of Washington: Institute for Learning
and Brain Sciences

JAMIE PHILIPS-JIMENEZ, M.ED

University of Washington: Cultivate Learning

MARICELA RODRIGUEZ

Washington State Association
for Head Start / ECEAP – Parent Ambassadors

SAHRA IBRAHIM

Voices of Tomorrow

SARAH LOEFFLER

Voices of Tomorrow

ZAM ZAM MUHAMED

Voices of Tomorrow

SHERYL FRYBERG, MSW

Betty J Taylor Early Learning Academy,
Tulalip Tribes

ABDULLAHI M. ABDULLAHI

DCYF, Professional & Workforce Development

CASANDRA WILKERSON

DCYF, Professional & Workforce Development

GRACE SSEBUGWAWO, MPPA

DCYF, ECEAP

KELLI DEBOER

DCYF, ECEAP

MICHELLE JOHNSON

DCYF, ECEAP

MICHELLE ROBERTS

DCYF, Professional & Workforce Development

WENDY THOMAS

DCYF, Office of Tribal Relations

XYZLORA BROWNELL

DCYF, ECEAP

Asalkii hore



Barashada labada luqadood waxay ka kooban tahay barashada labada luuqadood, sida caadiga ah Af-Ingiriisiga iyo luqadda bartilmaameedka ah ee aan Af-Ingiriisiga ahayn, iyada oo ujeedadu tahay in la gaaro laba-luqad, akhris-qoris, iyo dhaqan-dhaqameed Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri <https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=43.216.105>. Barnaamijyada iyo xirfadlayaasha bixiya jawi waxbarasho oo noocan oo kale ah waxay leeyihiin aqoon iyo xirfado gaar ah.

Gobolka Washington waxa uu leeyahay dad tiro badan oo koraya oo carruur iyo qoysas ku hadla luqado badan. Si loo daboolo baahida carruurta ku hadasha luqadaha badan, waa inaan bixinaa jawi waxbarasho oo jawaab leh oo loo dhan yahay. Barashada laba-luqaduhu waxay bixisaa fursad ah in meesha laga saaro caqabadaha iyo kordhinta helitaanka khibradaha tayada sare leh ee carruurta iyo qoysaska kuwaas oo ah kuwa ugu liita xagga sinnaanta waxbarashada. Waxbarashada labada luqadood waa qaabka kaliya ee barnaamijka horumarinta luqadda Af-Ingiriisiga kaas oo si buuxda u xiraya waxbarashada iyo fursadaha ardayda afaf badan/Af-Ingiriisi iyo kooxaha kale ee ardayda taariikh ahaan aan loo adeegin. (Collier & Thomas, 2004, 2017; Lindholm-Leary, 2017).

Qaab dhismeedka dukumeentigu wuxuu ku salaysan yahay dhowr ilo oo muhiim ah:

- Xarunta Cilmiga Luqadaha' Dual Language Guiding Principles, 3rd edition
www.cal.org/wp-content/uploads/2022/06/GuidingPrinciplesforDualLanguageEducation3rdeditionREV.pdf
- Heerarka Tayada ee loo yaqaan (Early Achiever) ;Early Achievers Quality Standards;
www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/early-achievers/quality-standards
- Talaabooyinka Koowaad:
 - Warbixin ku saabsan Soo noolaynta Afka Qabiilka (Tribal): Report on Tribal Language Revitalization
<https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/sites/default/files/pdf/report-tribal-language-revitalization.pdf>
 - Bayaanka Siyaasadda Labada Luuqadood: Dual Language Policy Statement
<https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/sites/default/files/pdf/dll-policy-statement-final.pdf>
 - Mabaadi'da Hogaaminta Dhaqamada Kala Duwan ee Barayaasha Xanaanada Caruurta: Multicultural Principles for Early Childhood Leaders
<https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/culture-language/article/multicultural-principles-early-childhood-leaders>
- Heerarka Waxqabadka ECEAP: ECEAP Performance Standards
www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/eceap/contractors
- *Washington's Early Learning and Development Guidelines* (EL_0015)
www.dcyf.wa.gov/publications-library/EL_0015
- WIDA Early Years Guiding Principles
<https://wida.wisc.edu/sites/default/files/resource/Guiding-Principles-of-Early-ELD.pdf>

Hogaamiyayaasha mashruuca iyo kooxda la-talinta waxay raadiyeen waxyaabaha ay wadaagaan Heerarka ayaa dejiya himilada laba-luqadlaha ah ee daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada. Tan waxaa loogu talagalay in ay noqoto dukumeenti nool oo si joogto ah loo cusboonaysiin doono si ay u muujiso isbeddellada cilmi-baarista, ku-dhaqanka, siyaasadda, iyo jawaab-celinta bulshada.





UJEEDO

Heerarka Labada Luuqadood waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo qaab-dhismeed dhammaystiran oo cilmi-baaris lagu taageerayo, oo ah hababka ugu wanaagsan ee lagu aqoonsanayo, kor loogu qaadayo barashada labada luqadood ee daryeelka waxbarashada hore. Heerarka iyo Hababka ugu Fiican waxaa loogu talagalay bixiyeyaasha, tababarayaasha, iyo barayaasha. Waxa loo isticmaali karaa in lagu daro dhaqamada iyo ficilada caawiya ardyada labada luuqadood ku hadla inay u diyaar garoobaan dugsiga oo ay abuuraan jawi waxbarasho oo jawaab celin leh. Hogaamiyayaasha barnaamijku waxay u isticmaali karaan dukumeentigan:

- fikir iyo qorshayn horudhac toos leh
- ka caawinta hirgelinta barnaamijka socda
- La soco waxtarka barnaamijka

Heerarka, qaab dhismeed ahaan, waxay ka tarjumayaan micnaha ay tahay in la taageero kala duwanaanshaha luqadda iyo in si ula kac ah loo sameeyo dhaqamada waxbarashada hore, si loo dhiso nidaam ka-hortagga cunsuriyadda (anti-racist) iyo qaabka waxbarashada hore ee loo dhan yahay.



MABAADI'DA LA RAACO

Kooxda la-talintu (advisory workgroup) waxay soo saartay oo raacday mabaadi'da hagidda si ay ugu wargeliso horumarinta Heerarka Labada Luuqadood.

- Shaqaalaha ku hadla labada-luuqadood ayaa fure u ah barnaamijka labada-luuqadood.
- ka qaybqaadashada qoyska ayaa muhiim u ah guusha ubadka.
- Ka-qaybgalka bixiyeyaasha adeegga tooska ah ayaa muhiim u ah horumarinta Heerarka.
- U hoggaansanaanta nidaamyada waxbarashada hore ee DCYF waa qasab.
- Waa lagama maarmaan in la iswaafajiyo nidaamka luuqadaha maxalliga ah iyo kuwa qaranka ah.



DULMAR KU SAABSAN: HEERARKA LABADA LUUQADOOD

Halbeegga la wadaago waa sida soo socota:

 **MANHAJKA & QIIMAYNTA**

 **QAAB DHISMEEDKA BARNAAMIJKA**

 **ISKU-DHAFKA DHAQANKA**

 **FAMILY ENGAGEMENT & COMMUNITY PARTNERSHIPS**

 **TILMAAMAHA DHAQANKA IYO LUUQADDA QABIILKA (TRIBAL LANGUAGE)**



Goordhow imaanaya!



Aqoonta Shaqaalaha

DCYF waxay sii wadi doontaa inay la shaqeyso kooxaha la-talinta si ay u horumariyaan heerka shahaadooyinka, shaqaalaha kaas oo ah mid loo siman yahay oo buuxiya baahida bixiyayaasha waxbarashada hore.

Heerarka Barnaamijyada Labada-Luuqadood iyo Hababka ugu Fiican

Manhajka iyo Qorshaynta

Manhajka iyo qorsheynta barnaamijyada labada-luqadood waxay muujinaysaa u heellanaanta saddexda yool ee waxbarashada laba-luqadood: waxbarashada laba-luqadood, ku-hadalka luqadaha badan, iyo wacyiga caalamiga ah. Inta badan manaahijta waxaa loogu talagalay qorista Af-Ingiriisiga iyo waxbaridda. Natiijo ahaan, barayaasha iyo agaasimayaasha barnaamijku waa inay la qabsadaan, si ay u muujiyaan oo u qiimeeyaan luqadaha iyo dhaqamada daryeelka carruurta.



MANHAJKA KOORSADA IYO QIIMAYNTA

Heerka	Dhaqamada
1. Manhajka iyo agabku waxay ka tarjumayaan dhaqamada carruurta iyo qoysaska barnaamijka waxayna kor u qaadaan horumarinta luqadda.	<ul style="list-style-type: none"> a) Manhajku wuxuu ilaaliyaa heerka siman ee labada luqadood ee barnaamijka. b) Qalabka waxbarashadu waxa uu ka tarjumayaa daryeelka carruur kala duwan, qoysas iyo qaab-dhismeedka qoyska. c) Manhajka loo isticmaalo jawiga barashada luqadda waxa uu daboolayaa baahida luqadeed-ka ee carruurta.
4. Marka la helo qiimeyn ku habboon dhaqan iyo luqad ahaanba.	<ul style="list-style-type: none"> a) Barnaamijku waxa ku jira qalab iyo agab ka caawinaya qiimaynta luqadda iyo xog ururinta waqti ka dib. b) Carruurta waxaa lagu qiimeeyaa luqadda ay aadka ugu qanacsan yihiin. c) Xaruntu waxay leedahay agab lagu caawiyo waalidiinta iyo macalimiinta inay la xiriiraan horumarka ilmahooda xagga luqadda ama xagga qoyska iyo wada xidhiidhka. d) Ujeedooyinka luqadda iyo waxbarashada ee ilmo kasta waxaa lagu horumariyaa qiimayn, milicsi, iyo xaqiijin.

Qaab dhismeedka Barnaamijka

Qoysaska, macalimiinta, shaqaalaha, iyo hogaamiyayaasha dhamaantood waxay wadaagaan himilada rajooyinka sare ee barnaamijyada labada luqadood. Barnaamijyada labada luqadood ee ugu waxtarka badan uguna guuleysta waxaa ka mid ah waxqabadyada kobcinta ee labada luqadood ee waxbarashada, iyo sidoo kale dhaqanka qoyska iyo bulshada.



QAAB DHISMEEDEKA BARNAAMIJKA

Heerka	Dhaqamada
3. Dhammaan qaybaha barnaamijku waxay ka wada shaqeeyaan sidii loo gaari lahaa saddexda yool ee ugu muhiimsan ee waxbarashada laba-luqadood: guul waxbarasho, laba-luqadood iyo aqoonyahan, iyo wacyi-gelinta caalamiga ah.	<ul style="list-style-type: none"> a) Waxaa jira laba (ama ka badan) luqadood oo lagu aasaasay deegaanka waxbarashada. b) Carruurta waxay wax ku bartaan luqadaha barnaamijka ee la aasaasay. c) Ugu yaraan hal macalin oo ku jira fasalka laba-luqadood ayaa u shaqeeya hababka ugu fiican ee ardayda ku hadasha luqadaha badan. d) Ugu yaraan hal macalin oo ku jira fasalka laba-luqadood ayaa si fiican ugu hadla mid ka mid ah luqadaha barnaamijka.
4. Deegaanka barashada afku waxa uu kor u qaadaa horumarinta labada luqadood.	<ul style="list-style-type: none"> a) Fasalka laba-luqadlaha ah, ugu yaraan hal ilmo ayaa ku hadla luqadda lammaanaha ee aan Af-Ingiriisiga ahayn luqaddooda koowaad ama labaad. b) Barnaamijku waxa uu ku dadaalayaa in uu haysto ugu yaraan 50% dadka aan ku hadlin Ingiriisiga in ay ka qaybqaataan jawiga barashada luqadda (Barnaamijyada qabyaaladda laga dhaafdo). c) The program provides at least 50% of the time with children in the established partner language in the language learning environment (Tribal programs exempt).
5. Barnaamijka waxa loo qaabeeyey iyadoo maskaxda lagu hayo ujeedooyinka qoyska iyo bulshada.	<ul style="list-style-type: none"> a) Hogaamiyayaasha barnaamijyada labada luqadood waxay siiyaan qoysaska, bulshada, iyo shaqaalaha fursado si ay wax u bartaan, u wadaagaan, oo uga bixiyaan jawaab celin barnaamijka. b) Qoysasku siyaabo kala duwan ayay u taageeri karaan una doodi karaan baahiyaha iyo yoolalka ilmahooda. c) Qoyska iyo/ama la-hawlgalayaasha bulshada ayaa ku lug leh oo lagu wargeliyay barnaamijka. d) Qoyska iyo xubnaha bulshada waxay la kaashadaan barnaamijka si qoyska iyo dhaqanka bulshada loogu daro manhajka.



Kala duwanaanta Dhaqanka

Jawi wax-barashadu waxa uu u baahan yahay sinnaanta dhammaan kooxaha. Faham buuxa ee iyo ku darida mawduucyada dhaqamada kala duwan ee casharrada fasalka ayaa loo baahan yahay.



KALA DUWANAANTA DHAQANKA

Heerka	Dhaqamada
6. Barnaamijku waa mid ka kooban dhammaan dhaqamada iyo luqadaha qoysaska barnaamijka.	<ul style="list-style-type: none"> a) Waxa jirta siyaasad qoran oo sharxaysa sida barnaamijku u caawiyo kor u qaadida ixtiraam, jawi soo dhawayneed oo ay ku jiraan ilmo kasta iyo qoyskooda. b) Waxaa jira xeelado iyo qorshayaal lagu shakhsiyeynayo laguna taageerayo dhammaan carruurta ku nool deegaan loo dhan yahay. c) Xarunta iyo shaqaaluhu waxay ixtiraamaan kala duwanaanshaha dhaqanka ee waxbaridda shucuurta-bulsheed iyagoo baranaya asalka qoysaska, caadooyinka, iyo qiyamka ku saabsan dabecadaha adag, dib u hagidda, iyo hagidda. d) Hogaamiyayaashu waxay kor u qaadaan dadaallada wacyigelinta dhaqanka, waxay bixiyaan fursado horumarinta xirfadeed, waxayna u furan yihiin fikrado iyo aragtiyo cusub.
7. Luqadaha, dhaqanka, iyo kala duwanaanshaha (diversity) carruurta iyo qoysaska fasalka waxay ka muuqdaan jawiga waxbarashada.	<ul style="list-style-type: none"> a) Isdhexgalka luqadda waxaa lagu suurtagelin karaa waayo-aragnimada dhaqameed-ka iyo waxqabadyada sida riwaayadaha, sheeko-sheekeysiga, muusi-ga, iyo in ka badan. b) Iyada oo la adeegsanayo boodhadhka, shaqada farshaxanka, alaabta carruurta ku ciyaarto, buugaagta, iyo agabka kale ee waxbarashada, deegaanka daryeelka ayaa ka tarjumaya dhaqanka, luqadda, iyo kala duwanaanta (diversity).

Ka-dhanka qoyska & iskaashiga bulshada

Barnaamijyada laba-luqadood waxay aad waxtar u leeyihiin marka qoysaska iyo bulshada lagu martiqaado inay ka qaybqaataan oo ay la shaqeeyaan barnaamijka.



KA-DHANKA QOYSKA & ISKAASHIGA BULSHADA

Heerka	Dhaqamada
8. Barnaamijku waxa uu dhiirigeliyaa ixtiraamka, qoyska iyo ka qaybgalka bulshada.	<ul style="list-style-type: none"> a) Deegaanka daryeelka ayaa ah mid soo dhaweyn leh, dhammaan qoysaskana waxaa lagu qiimeeyaa sida wada-hawlgalayaasha waxbarashada. b) Waxa jira goobo soo dhawayneed oo loogu talagalay qoysaska inay isku xidhaan, wadaagaan yoolalka, iskaa wax u qabso, iyo inay bixiyaan jawaab celin barnaamijka. c) Carruurta leh dabeecad adag iyo baahiyaha korriinka waxa lagu taageeraa tababarka shaqaalaha, wada shaqaynta, iyo iskaashiga qoyska ee luqadda ay doorbidayaan qoyska.
9. Barnaamijku luqad ahaan waa la heli karaa, wuxuuna kobciyaa xidhiidh togan oo socda oo lala yeesho qoysaska.	<ul style="list-style-type: none"> a) Marka la qorayo, habab ayaa jira si loo go'aamiyo luqadda qoysku doorbido. b) Waxaa jira qof kaalmeeya qoyska/bulshada oo ka mid ah shaqaalaha kaasoo la xiriiri kara inta badan ardayda labada luuqad iyo qoysaskooda. c) Barnaamijku waxa uu qoysaska ka hawlgeliyaa luqadda iyo habka ay doorteen, ha noqoto turjumaan, qoraal ama hadal, ama habab kale. d) Natiijooyinka qiimeynta iyo isgaarsiinta kale waxaa lagu geeyaa qoyska luqadda ay doorbidaan.
10. Hogaamiyayaasha barnaamijku waxay la falgalaan qoysaska waxayna wadaagaan faa'iidooyinka iyo natiijooyinka barashada laba luqada ee carruurta.	<ul style="list-style-type: none"> a) Hogaamiyayaasha barnaamijka iyo shaqaaluhu waxay siiyaan qoysaska xeelado, cilmi baaris, iyo fikrado lagu taageerayo fursadaha luqadeed ee tayada sare leh ee guriga iyo bulshadooda. b) Hogaamiyayaasha barnaamijka iyo shaqaaluhu waxay qiimeeyaan ku hadalka luuqadaha badan waxayna u doodaan barashada labada luuqad ee bulshada ku xeeran.

Tilmaamaha Dhaqanka ugu Wanaagsan ee Luuqadda iyo Dhaqanka Qabiilka

Tilmaamaha Afka iyo Dhaqanka Qabiilka

Qabiilada Washington waa bulshooyin ku dhisan qoys, dhaqan, iyo caado. Tilmaamaha hoose waxaa la abuuray iyadoo lala kaashanayo kooxda la-talinta labada luuqad, Siyaasadda Hindida ee Barashada Hore, iyo shaxda qabiilka.



TILMAAMAHA AFKA IYO DHAQANKA QABIILKA

Heerka	Dhaqamada
1. Odayaasha qabiilka iyo xubnaha qoyska waa lagu soo dhawaynayaa inay ka qaybqaataan barnaamijka.	<ul style="list-style-type: none"> a) Waxaa jira fursado ay qoysasku ku bartaan luqadda. b) Dhowr jeer sannadkii, odayaasha ayaa lagu martiqaadaa fasallada. c) Xubnaha qoyska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay wadaagaan dhaxalkooda.
2. Iyada oo qayb ka ah barnaamijka, waxqabadyada dhaqanka qabaa'ilka ayaa diyaar ah.	<ul style="list-style-type: none"> a) Kooxaha qabaa'ilka ee barnaamijka ku jira ayaa ah isha koowaad ee barnaamijka. b) Dhaqdhaqaaqyada dhaqanka sida qoob ka ciyaarka, goosashada xilliyeedka, cuntooyinka, muusiga, farshaxanka, sheeko-xariirada, iyo waxbarista dhaqanka ayaa lagu wadaagaa fasalka dhexdiisa.
3. Wakiilada qabiilku waxay baraan carruurta iyo shaqaalaha.	<ul style="list-style-type: none"> a) Qofka qabiilka ah ayaa u horseedaya casharrada carruurta. b) Macalimiinta kale waxay ku daraan erayo/luqad waxbarashadooda. c) Casharro luuqadeed ayaa diyaar u ah shaqaalaha.

Qaamuuska

Deegaanka daryeelka.

Intaa waxaa dheer, eeg jawiga waxbarashada iyo fasalka. Deegaan barbaarinta oo kor u qaada horumarka dhammaan carruurta yaryar.

Fasalka.

Sidoo kale eeg deegaanka daryeelka iyo deegaanka waxbarashada. Deegaanka kobciya horumarka dhammaan carruurta yaryar.

Waxbarashada labada luqadood.

Nooc ka mid ah waxbarashada laba-luqadlaha ah oo ay carruurta ku bartaan akhriska iyo qoraalka labada luqadood.

Barta labada luqadood.

Bartayaasha luqadaha badan waa erey kale oo loogu talagalay bartayaasha luqadaha badan. Carruurta laba luqadood ama ka badan isku mar baranaya, ama carruurta luqad labaad baranaysa iyagoo weliba horumarinaya afkooda hooyo.

Luqada la aasaasay.

Luqadda Sawirka ee laga heli karo barnaamijka ama fasalka, sida lagu qeexay Buug-gacmeedka Shaqaalaha ama Qoyska ama dukumentiyada kale ee waxbarashada.

Deegaanka waxbarashada.

Sidoo kale eeg deegaanka daryeelka iyo fasalka. Deegaanka kor u qaada koritaanka dhammaan carruurta yaryar. Qalab, agab iyo sahay ku habboon da'da ayaa diyaar ah.

Barta luqadaha badan.

Ardayda wax baranaysa laba ama in ka badan isku mar.

Luuqadda lammaanaha.

Luqadda loo isticmaalo luqad wadaag ahaan laakiin aan Ingiriisi ahayn; luqad aasaasi ah. Ingriiska ka sokow, luqadda rasmiga ah ee laga heli karo barnaamijka ama fasalka.

Bixiye.

Barayaasha daryeelka xanaanda waxbarashada hore waxay bixiyaan daryeel barnaamijka waxbarashada hore. (from PD definition guide: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/PD-DefinitionGuide.pdf)



Center for the Study of Social Policy (CSSP). *Strengthening Families Self-Assessment Tool for Center-Based Early Care and Education Programs*. <https://cssp.org/wp-content/uploads/2018/10/CENTER-BASED-EARLY-CARE-AND-EDUCATION-PROGRAM-SELF-ASSESSMENT.pdf>

Center for the Study of Social Policy (CSSP). (2014). *Strengthening Families Self-Assessments for Family Child Care Programs*. <https://cssp.org/wp-content/uploads/2018/10/FAMILY-CHILD-CARE-PROGRAM-SELF-ASSESSMENT.pdf>

Collier, V.P., & Thomas, W.P. (2004). The astounding effectiveness of dual language education for all. *NABE Journal of Research and Practice*, 2 (1), 1-20. https://static1.squarespace.com/static/5d854ac170e64a71d1de71d3/t/5d9cb8927d796c384c56656d/1570551960353/2004-winter_njrp_astounding-effectiveness-of-dl.pdf

Collier, V.P., & Thomas, W.P. (2017). Validating the power of bilingual schooling: Thirty-two years of large-scale, longitudinal research. *Annual Review of Applied Linguistics*, 37, 1-15. <https://static1.squarespace.com/static/5d854ac170e64a71d1de71d3/t/5d9cb55f26d64b44562c6069/1570551181085/ARAL+2017+%28typed%29.PDF>

Head Start Early Childhood Learning & Knowledge Center. *A Report on Tribal Language Revitalization in Head Start and Early Head Start*. U.S. Department of Health and Human Services, Administration for Children and Families, Office of Head Start and the National Center of Cultural and Linguistic Responsiveness. <https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/sites/default/files/pdf/report-tribal-language-revitalization.pdf>

Head Start Early Childhood Learning & Knowledge Center. (2021). *Multicultural Principles for Early Childhood Leaders*. U.S. Department of Health & Human Services (HHS). <https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/culture-language/article/multicultural-principles-early-childhood-leaders>

Head Start Early Childhood Learning & Knowledge Center. (2021). *Policy Statement on Supporting the Development of Children Who Are Dual Language Learners in Early Childhood Programs*. U.S. Department of Health & Human Services (HHS), U.S. Department of Education. <https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/sites/default/files/pdf/dll-policy-statement-final.pdf>

Howard, E., Lindholm-Leary, K., Rogers, D., Olague, N., Medina, J., Kennedy, B., Sugarman, J., & Christian, D. (2018). *Guiding Principles for Dual Language Education* (3rd Ed.). Center for Applied Linguistics.

Washington Department of Children, Youth & Families. (2021). *2021-22 ECEAP Performance Standards*. <https://dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/eceap>

Washington Department of Children, Youth & Families. (2021). *Early Achievers – Washington’s Quality Recognition and Improvement System Quality Standards and Criteria (EPS_0057)*. www.dcyf.wa.gov/publications-library/EPS_0057

WIDA. (2020). *ABCs of Family Engagement*. Wisconsin Center for Education Research. University of Wisconsin-Madison. <https://wida.wisc.edu/sites/default/files/resource/ABCs-Family-Engagement.pdf>

WIDA. (2020). *WIDA Early Years Guiding Principles of Language Development*. Board of Regents of the University of Wisconsin System. <https://wida.wisc.edu/sites/default/files/resource/Guiding-Principles-of-Early-ELD.pdf>





Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

www.dcyf.wa.gov

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.

DCYF PUBLICATION EL_0065SM (01-2023)